

Habka Ashtakada Rasmiga ah ee Section 504

Si loo xareeyo dacwo rasmi ah oo hoos timaadda Section 504, waalidka/masuulka ardaygu wuxuu isticmaali karaa habkan soo socda.

Degmada Saint Paul Public Schools (SPPS) waxay ku boorinaysaa dhinacyada muransan inay marka hore isku dayaan inay ka xalliyaan dacwadooda dhanka wakiilka dhismaha 504 iyo/ama maamulaha dhismaha ka hor intaysan soo gudbin dacwo rasmi ah. Haddii isku dayga xalkan uu guuldarraysto, dacwo rasmi ah waxaa lagu xarayn karaa qoraal ahaan iyadoo loo dirayo Isuduwaha Section 504 ee Degmada:

District Section 504 Coordinator
Beth Coleman
Saint Paul Public Schools
Office of College and Career Readiness
beth.coleman@spps.org
651-744-7378
<https://www.spps.org/section504>

Habka loo xareeyo dacwada rasmiga ah ee hoos timaadda Section 504 waa sida soo socota:

1. Dacwaddu waa inay ahaataa qoraal waana inuu saxeexaa qofka dacwada soo gudbinaya.
FIIRO GAAR AH: Qofka dacwada soo gudbinaya wuxuu dacwada ugu soo bandhigo af ahaan Isuduwaha Section 504 ee Degmada oo ka dibna Iskuduwaha ayaa ka caawin doona qofka dacwada soo gudbiyay si uu u qoro dacwada.

1. Dacwada waa in lagu soo gudbiyaa soddon (30) maalmood gudahood oo ah maalmaha kaalandarka.
FIIRO GAAR AH: Dacwad la soo gudbiyay in ka badan soddon (30) maalmood oo ah maalmaha kaalandarka lama tixgelin karo.

Isku-duwaha Section 504 waxay isku dayi doontaa inay si degdeg ah arrinta ku xalliso dhinacyada ay khusayso. Iskuduwaha Section 504 ayaa baari doonta dacwada iyadoo xog ka qoreyso ardayga, waalidka/masuulka iyo macallimiinta hadba sida loo baahdo, oo waxayba qoraal ugu soo jawaabi doontaa qofka dacwada soo gudbiyay soddon (30) maalmood gudahooda marka baaritaanka la dhammeeyo..

1. Haddii qofka dacwada soo gudbiyay uu rabo inuu rafcaan ka qaato go'aanka Isuduwaha Section 504 ee Degmada, qofka dacwada soo gudbiyay wuxuu qoraal rafcaan ah oo saxeexan u soo gudbin karaa Isu-Duwaha Guud ee Iskoollada ama qof arrintaas loo magacaabay.
FIIRO GAAR AH: Rafcaan-qaadashada waa in lagu sameeyaa shan (5) maalmood gudahooda ka dib markii la helo jawaabta Isuduwaha Section 504 ee Degmada.

Isu Duwaha guud ama qofka arrintan loo magacaabay waa in uu la kulmo dhammaan dhinacyada ay khusayso, oo uu soo diyaariyaa gunaanad iyo jawaab qoraal ah oo ku socoto qofka dacwada soo gudbiyay soddon (30) maalmood gudahooda marka kulanka la dhammeeyo.



da ku Socoto Waaxda Xuquuqul Insaanka ee Minnesota ama Xafiiska Federaalka ee Xuquuqaha Madaniga ah:

Inta lagu jiro nidaamka hawsha dacwada, qof ah waalid, masuul, ama arday ayaa buuxin kara dacwad ay u gudbinayaan hay'adaha gobolka ama dawladda dhexe.

Dacwadaha Heer Gobol:

Minnesota Department of Human Rights
Freeman Building
625 Robert St. N
St. Paul, MN 55155
Taleefan: 651-539-1100
Toll Free: 1-800-657-3704
Fax: 651-293-9042, or TTY: 651-296-1283
Email: info.MDHR@state.mn.us
www.mn.gov/mdhr

Dacwadaha Heer Federaal (Dawladda Dhexe):

Illinois, Indiana, Iowa, Minnesota, North Dakota, Wisconsin

Office for Civil Rights, Chicago Office
U.S. Department of Education
John C. Kluczynski Federal Building
230 S Dearborn Street, 37th Floor
Chicago, IL 60604
Taleefan: (312) 730-1560
Fax: (312) 730-1576
Email: OCR.Chicago@ed.gov

Xaqa in Dacwaddaada la Dhagaysto

Wixii dacwo ah ee la xiriiro qaabka ay Degmada SPPS u sameyso aqoonsiga ardayda, qiimaynta iyo/ama meelaynta heerka waxbarasho ee ardayga sida hoos timaada Section 504, waalidka/masuulka iyo ardaygu waxay xaq u leeyihiin dhageysi dhexdhexaad ah.

Waalidiinta/masuulka waxay fursad u haystaan inay

1. Ka qayb qaataan kulanka dhageysiga.
2. Inuu metelo qareen sharci.
3. Baaraan diiwaannada khuseeya arrintan.
4. Raadiyaan dib u eegis go'aanka quseysa taasoo ay ku jirto dib u eegis uu sameeyo garsoore.

Xuquuqahan waxaa lagu sii sharraxay Ogeysiiska Ilaalinta Nidaamka.